



Warbixinta Cusub ee COVID-19 ee Magaalada Burlington

Xarunta Kheyraadka iyo Soo-kabashada
COVID-19 (RRC) ee Burlington

Febraayo 2021

Somali

Qodobada:

- Tallaalo bilaash ah ayaa hada loo heli karaa dadka 75 sano jirka ah iyo wixii ka weyn
- Wajiyada tallaalka ee mustaqbalka waxaa ka mid ah dadka jira da'da 70+, ka dibna 65+, taariikhaha sii deynta lama shaacin
- Helitaanka tallaalka ee Vermont ayaa sii kordhi doonta toddobaadyada soo socda
- Raadi tilmaamo ku saabsan sida la iskaga diwaan geliyo tallaalka
- Sii wad tallaabooyinka badbaadada ka dib markaad qaadato tallaalka (gacmaha dhaq, xiro maaskaro, ka fogow kulammada dadka badan)
- Macluumaadka Baaritaanka ee bisha Febraayo

Qaybinta Tallaalka

Ballamaha tallaallada COVID-19 ayaa hadda loo heli karaa dadka jooga Vermont ee jira da'ada 75 ama ka weyn!

Waaxda Caafimaadka Vermont waxay bixisay faahfaahin ku saabsan sida dadka jira 75 ama ka weyn ay isaga diiwaangelin karaan tallaalka COVID-19 ee BILAASHKA AH BADBAADADANA LEH.

Dadku waxay qabaan laba xulasho oo ay iskaga diiwaangelin karaan:

1. Iska diiwangelinta khadka tooska ah <https://www.healthvermont.gov/covid-19/vaccine/getting-covid-19-vaccine> (isdiiwaangelinta khadka tooska ah waa Ingiriis)
2. Adigoo wacaya khadka taleefanka ee talaalka 855-722-7878, oo riixaya 1 si aad iskaga diiwaangeliso adigoo isticmaalaya luqadaha aan Ingiriisiga ahayn. Saacadaha Shaqada ee Xarunta Wicitaanku waa Isniinta-Jimcaha, 8:15 a.m. - 5:30 p.m. iyo Sabti iyo Axad, 10:00 a.m. - 3:00 pm Haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad isu diiwaangeliso, wac maamulaha kiiskaaga ee Ururka Afrikaanka ama Barnaamijka Qaxootiga. Haddii aadan lahayn maamule kiis, wac Barnaamijka Qaxootiga 802-655-1963 ama Ururka Afrikaanka adigoo isticmaalaya taleefanka 802-355-0795 waxaana lagugu xiriirin doonaa qof ku hadla luuqadaada.

Kuwani waa macluumaadka lagu weydiin doono inaad bixiso:

- Magaca (uma baahnid inaad tusto aqoonsi)
- Taariikhda dhalshada
- Cinwaanka
- Cinwaanka iimaylka, haddii aad mid leedahay
- Lambarka taleefanka
- Macluumaadka caymiska ee aasaasiga ah (ikhtiyaari ah, khasab ma aha)
- Su'aalaha kale ee caafimaadka la xiriira sida macluumaadka caafimaadka ama xaaladaha caafimaadka



Fadlan tixgeli sida aad uga caawin karto dadka waaweyn ee qoyskaaga ama bulshadaada inay iska diiwaangeliyaan tallaalkan. Lama oggolaan doono iska imaanshaha xilligan dadku waa inay ballan hormaris ah sii qabsadaan. Caymis khasab ma aha, talaalkuna waa lacag la'aan. Kuwa qaata tallaalka waxay u baahan yihiin inay sii wadaan tallaabooyinka badbaadada, sida xirashada maaskaro, ka fogaanshaha dadka kale ee ka baxsan qoyskooda, iyo u dhaqista ama u nadiifinta gacmaha si joogto ah. Fadlan sii wad inaad raacdo tilmaamaha Gobolka, waqti xaadirkan waxaa dadka laga niyad jebinayaa isku imaanshaha.

Wajiga xiga ee qeybinta tallaalka waxay noqon doontaa in la siiyo dadka jira da'ada 70 iyo wixii ka weyn, ka dibna da'ada 65 iyo wixii ka weyn, si kastaba ha noqotee, Waaxda Caafimaadka Vermont weli ma aysan soo saarin wax ogeysiis ah goorta ay wejiyadahani u furmi doonaan xubnaheenna da'ada ah. Wejiyadaani waxay u badan tahay inay isa soo dulmari doonaan bilaha soo socda. Boosaska hadda waa xaddidan yihiin, laakiin sahayda tallaalka Vermont way sii kordhi doonaan toddobaadyada soo socda, iyadoo la bixin doono qiyaastii 8,000 ilaa 10,800 doos/qiyaasood usbuucii. In kasta oo sahaydu sii ballaaranayaan, ballantaada waxaa wanaagsan inaad sii qabsato dhowr toddobaadyo ka hor maadaama tallaalku uusan weli si ballaaran uwada gaarin dadweynaha.

Fiidiyowga ku saabsan Isdiiwaangelinta:

<https://www.youtube.com/watch?v=kUJphL0cn2E&t=3s>

Baaritaanka COVID-19

Baaritaanka waxaa laga heli karaa maalin walba Burlington (405 Pine St.) iyo Winooski (32 Mallets Bay Ave), iyadoo ay jiraan xarumo kale oo dheeraad ah bisha oo dhan. Dhowr xarumood oo xilligaad doonto la iska aadi karo ayaa la heli karaa. TALLAALKA LAGAMA HELO XARUMAHA BAARITAANKA. Haddii ay dhibaato kaa haysato isdiwaangelinta baaritaanka, waxaad u wici kartaa maamulaha kiiskaaga ee jooga AALV ama USCRI, ama waxaad la xiriiri kartaa RRC, waxaan ka shaqeyn doonaa inaan sida ugu fiican kuu caawinno.

<https://www.healthvermont.gov/covid-19/testing/where-get-tested> (Ingiriis ah)

fursadaha baaritaanka way isbadali karaan maadaama Waaxda Caafimaadka ay cusbooneysiinayaan qorshayaashooda

Istuudiyaha Farshaxanka Magaalada Burlington (Burlington City Arts Studio) - 405 Pine St, Burlington VT, 05401

Goobta baaritaanka waxay ku taalaa booska ku xiga istuudiyaha Farshaxanka Magaalada Burlington ee 405 Pine Street

Adeegyada turjubaanka qof-ahaaneed ayaa la heli karaa wakhti kasta maalin kasta iyo dhowr baaritaanada ballan la'aanta la sameeyo ah ayaa la heli karaa

Waxay shaqeysaa maalin kasta: 10:00 am – 6:00 pm maalin walba

Isdiwaangelin hore waxaa laga heli karaa websaydhka Waaxda Caafimaadka Vermont

Xarunta Bulshada ee O'Brien - 32 Malletts Bay Ave, Winooski VT, 05404

Adeegyada turjubaada qof-ahaaneed ayaa la heli karaa iyo dhowr baaritaanada ballan la'aanta la sameeyo ah ayaa la heli karaa

Waxay shaqeysaa maalin kasta: Isniinta, Arbacada & Jimcaha - 2:00 pm-8:00 pm, Talaado, Khamiis, Sabti, & Axad - 9:00 am-3:00 pm

Isdiwaangelin hore waxaa laga heli karaa websaydhka Waaxda Caafimaadka Vermont

Xarumaha Iska Soo Boodada ah

Dhamaan goobaha iska soo boodada ah waxay shaqeeyaan 9:00 am-3:00 pm

Isdiwaangelin hore iyo iska imaanshaha aan ballanta la qabsan ayaa la heli karaa

Burlington North End Studios - 294 North Winooski Ave, Burlington VT, 05401

Adeegyada turjubaanka shaqsiyeed ayaa la heli karaa

Jimco kasta: Febraayo 5^{ta}, 12^{ka}, 19^{ka}, iyo 26^{ka}

Colchester Malletts Bay Congregational Church - 1672 W Lakeshore Dr, Colchester, VT 05446

Adeegyada turjubaanka taleefanka ayaa la heli karaa

Khamiis kasta: Febraayo 4^{ta}, 11^{ka}, 18^{ka}, iyo 25^{ka}

Williston National Guard Armory - 7846 Williston Rd, Williston VT, 05495

Adeegyada turjubaanka taleefanka ayaa la heli karaa

Arbaco kasta: Febraayo 3^{da}, 10^{ka}, 17^{ka}, iyo 24^{ka}



Su'aalo miyaad qabtaa? Caawinaad u baahan tahay?

Xarunta Ka Soo Kabashada Iyo Kheyraadka COVID-19 ee Burlington (Burlington's COVID-19 Resource and Recovery Center) (RRC) waxay halkaan u joogtaa inay ku caawiso, nagala soo xiriir 802-755-7239 ama recovery@burlingtonvt.gov oo fariin noogu reeb magacaaga, luqadda aad doorbideyso, iyo macluumaadka lagaala soo xiriiro waxaanan ku caawin doonaa sida ugu dhakhsaha badan. Xarunteena wicitaanka waxay leedahay adeegyo turjumaad oo taleefan ah. Saacadaha shaqadeenu waa Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 am-4:30 pm.

Mahadcelinta:

Waaxda Caafimaadka Vermont

<https://www.healthvermont.gov/media/translation/covid-19-translations> (ka hel macluumaad turjuman oo ku saabsan COVID-19)

<https://www.healthvermont.gov/covid-19/testing/where-get-tested>

<https://www.healthvermont.gov/covid-19/vaccine>

Magaalada Burlington

<https://www.burlingtonvt.gov/covid-19/testing>

<https://www.burlingtonvt.gov/covid-19/vaccine> (kheyraad xaddidan oo la turjumay ayaa laga heli karaa bogga)

<https://www.burlingtonvt.gov/resources>

Sawirro laga soo qaaday Xarunta Kheyraadka iyo Soo-kabashada ee Magaalada Burlington (RRC)

Macluumaadka ku jira dukumintigan waa la beddeli karaa hadba marka la soo saaro ogeysiisyo cusub iyo marka tilmaamaha laga cusbooneysiyo heer qaran iyo heer gobol